

Waalidiinta ama Masuulka qaaliga ahoow:

(School name) wuxuu ka qeybgali doonaa Imtaxaanka Qaranka ee Horumarka Waxbarashada (NAEP) marka la gaaro (date). Qaran ahaan NAEP waa wakiilka ugu weyne wuxuuna sii wadaa qiimeynta ah waxa ay ardayda garanayaan wuxuuna sameeyn karaa maadooyinka kala duwan. NAEP waxaa maamulo Xarunta Qaranka ee Cabirada Waxbarashada, ee hoos timaadda Waaxda Waxbarashada ee Mareykana. NAEP way ka duwan tahay imtaxaanaadkeena gobolka sababtoo ah waa cabirk guud ee guusha dhammaan wadanka. Natijjooyinka waxaa loo soo daayaa sida Kaarka Warbixinta Qaranka, kaas oo bixinaya macluumaad ku saabsan guusha ardayga ee barayaasha, waalidiinta/masuuliyiinta, xeerdajiyaasha, iyo dadweynaha.

Cunugaaga ayaa geli kara imtaxaanka xisaabta, akhriska, ama sayniska. Marka lagu daro su'aalaha la xariira maadada, ardayda ayaa si iskood ah uga jawaabaaya su'aalaha xog aruurinta NAEP. Su'aaluuhu waxay xog muhiim ah ka baxshaan khibradaha waxbarashada ee ardayda ka qaybgalaysa iyo fursadaha wax ku barashada labadaba gudaha iyo banaanka fasalka. Xog dheeri ah oo ku saabsan su'aalaha xog uruurinta NAEP ayaa laga heli karaa <https://nces.ed.gov/nationsreportcard/parents> hoosta qaybta “What Questions Are on the Test (Waa maxay Su'aalaha Ku jira Imtaxaanka)?”

Imtaxaanku waxay ku qaadataa ku dhawaad 120 daqiqo inta badan ardayda, taasoo ay ku jirto wakhtiga kala wareega, tilmaamaha, iyo ka shaqeynta su'aalaha xog uruurinta.

Xogtaan la aruuriyay waxaa loo adeegsadaa ujeedooyin tirakoob keliya.

- Buundooyinka ardayga wax saamayn ah kuma dhacayaan.
- Ardayda waxaa looga dayn karaa imtaxaanka sabab walba, kuma qasbano inay dhamaystaan qiimeynta, wayna ka boodi karaan su'aalaha.
- Inkastoo qiimeyntu tahay mid ikhtiyaari ah, NAEP ayaa ku tiirsan ka qaybgalka ardayda si looga caawiyo xeer sameeyaasha hormarinta waxbarashada. Si kastaba ahaatee, haddii aadan rabin inuu canugaaga ka qeybqaato NAEP, fadlan igu soo sheeg qoraal Ku Taariikhaysan (date).

Looma baahna in loo diyaar garoobo qiimeynta NAEP, laakiin fadlan ku boori cunugaaga inuu dadaalkiisa ugu fiican sameeyo. La xiriir (name) oo laga wici karo (telephone number) ama ciwaanka (email address) ama Dr. Regina Lewis, oo aad ka helayso regina.lewis@maine.gov oo jooga Waaxda Waxbarashada ee Maine, haddii aad qabto wax su'aalo ah.

Waxaan ku faraxsannahay in dugsigeenu ka qaybgalo NAEP. Waxaan ognahay in ardayda (school name) ay muujin doonaan aqoonta iyo awooda ardayda wadankeena.

Daacadnimo,
(School Principal's Name)

Xarunta Qaran ee Cabirada Waxbarashada (NCES) ayaa fulinaysa Imtaxaanka Qaran ee Hormarka Waxbarashada si loo qiimeeyo barnaamijyada waxbarashada ee federaalku taageerto. Dhammaan xogta aad bixiso ayaa loo adeegsadaa keliya ujeedooyinka cabirada lamana shaacin karo, ama looma adeegsan kao, qaab lagugu aqoonsan karo ujeedo kasta oo kale marka laga reebo sida uu sharcigu amraayo (20 U.S.C. §9573 iyo 6 U.S.C. §151). Sida sharcigu qabo, shaqaale kasta oo u shaqeeyaa NCES iyo sidoo kale wakiil kasta oo NCES ah, sida iskuduweyaasha iyo iskuduweyaasha NCES, waxay galeen axdi waxayna marayaan xabsi dhan ilaa 5 sano, ama ganaax dhan \$250,000, ama labadaba haddii uu si kas ah u shaaciyo WAX kamid ah xogta lagugu aqoonsan karo. Gudbiinta elektarooniga ah ee xogtaada waxaa laga ilaalin doonaa fayraska, malweerka, iyo khataraha kale waxaana ka difaaci doona shaqaalaha federaalka iyo qandaraasleyaasha si waafaqsan Sharciga Hormarinta Amaanka Interneedka oo soo baxay 2015.